**OGAYSIISKA KOOWAN EE DHAQAMADA GAAR AHAANSHAHA WAXAY KU HABOON YIHIIN PHELPS HEALTH, KOOXDA CAAFIMAADKA PHELPS HEALTH, IYO PHELPS HEALTH HOMECARE (si wada jir ah loo tixraaco "PHELPS HEALTH")**

**OGAYSIISKAN WAXA UU FAAHFAAHINAYAA SIDA MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN AY U ISTICMAALI KARTO AMA U BAAHIN KARTO IYO SIDA AAD KU HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN DIB UGU EEG SI FEEJIGAN.**

Phelps Health waxay soo koobtay Ogaysiiska Lifaaqan ee Dhaqamada Gaar ahaanshaha ("Ogaysiiska") bogga koowaad. Faahfaahinta dhammayskra tiran ee xuquuqdaada iyo masuuliyadahayaga la xidhiidha macluumaadkaaga caafimaadka, fadlan dib u eeg Ogaysiiskan oo dhan.

## Xuquuqahaaga

Xaquuqdaada la xidhiidha macluumaadkaaga caafimaadka ay ku jiraan:

- Xaqa lagu codsado xayiraadaha qaabka aanu u isticmaalno oo u shaacino macluumaadkaaga caafimaadka.
- Xaqa lagu codsado sida aad nooga hesho macluumaadkaga caafimaadka anaga,
- Xaqa dib loogu eegayo oo nuqulo lagu helayo macluumaadkaaga caafimaadka ah
- Xaqa lagu codsado inaan wax ka beddelno macluumaadkaaga caafimaadka;
- Xaqa lagu ogaado sida aanu u shaacinay macluumaadkaaga caafimaadka;
- Xaqa lagugu wargeliyo haddii ay ku saamsayso jebinta macluumaadkaaga caafimaadka aan amniga ahayn; iyo,
- Xaqa inaan la dooran ku darida macluumaadkaaga caafimaadka is waydaarsiga macluumaadka caafimaadka.

Ma isticmaali doono ama ma shaacin doono macluumaadka caafimaadka ogolaansho la'aantaada, laga reebo haddii kale sida lagu faahfaahiyay Ogaysiiskan.

## Waxa Nalooga Baahan yahay In la Sameeyo

Waa masuuliyadayada inaad:

- Ilaaliso macluumaadkaaga caafimaadka
- Lagu siiyo ogaysiiskan; iyo
- Adeecdo shuruudaha Ogaysiiskan.

Waxaanu beddeli karnaa dhaqamadayada gaar ahaanshaha lagu sharaxay Ogaysiiskan. Haddii aanu go'aan ku gaadho inaan iyaga beddelno, waxaanu dib u eegi doonaa Ogaysiiskan oo waxaanu ku soo dhejin doonaa xarumahayaga iyo websaydkayaga bogga www.phelpshealth.org. Haddii aad qabto wax su'aalo ah iyo/ama aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah, fadlan la xidhiidh Sarkaalkayaga Gaar ahaanshaha lambarka (573) 458-7613.

* * * * * * * * * * * * * * *

**QIRASHADA HELIDA OGAYSIISKA PHELPS HEALTH EE DHAQAMADA GAAR AHAANSHAHA**

Waxaan qirayaa in la isiiyay Ogaysiiska Phelps Health ee Dhaqamada Gaar ahaanshaha.

Bukaanka ama wakiilka sharciga ah: ____________________________

Xidhiidhka (haddii uu ka duwan yahay xidhiidhka): _______________

Taariikhda: __________________________

□ Waalidku muu awoodin/diyaar uma ahayn inuu saxeexo qirashada

Sababta: ____________________________________

Xarfaha hore ee shaqaalaha _____________________ Taariikhda: __________________________

# OGAYSIISKA DHAQANADA GAAR AHAANSHAHA

## OGAYSIISKAN WAXA UU FAAHFAAHINAYAA SIDA MACLUUMAADKAAGA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN AY U ISTICMAALI KARTO AMA U BAAHIN KARTO IYO SIDA AAD UGU GELI KARTO MACLUUMAADKAN.
## FADLAN DIB UGU EEG SI FEEJIGAN.

### OGAYSIISKAN WAXA UU KU HABOON YAHAY PHELPS HEALTH, KOOXDA CAAFIMAADKA PHELPS HEALTH, IYO PHELPS HEALTH HOMECARE (si wada jid ah loo tixraaco "PHELPS HEALTH")

Phelps Health waxaa ka go'an ilaalinta gaar ahaasnhaha bukaanka oo waxay fahmaysaa ahmiyada ilaalinta macluumaadkaaga caafimaadka. Sharcigu waxa uu nooga baahan yahay ilaalinta gaar ahaanshaha macluumaadkaaga caafimaadka la aqoonsan karo ( ee loo yaqaano sida "Macluumaadka Caafimaadka Ilaashan" ama "PHI") iyo in lagu siiyo Ogaysiiskan, kaas oo sharaxaya waajibaadyadeena sharciga iyo dhaqamada gaar ahaanshaha xuquuqdaada si tixgelin u leh PHI. Waxaa la inooga baahan yahay adeecida shuruudaha Ogaysiiskan hadda dhaqan galka ah. Waxaa noo dhowran xaqa aanu ku beddelno dhaqamada gaar ahaanshaha lagu faahfaahiyay Ogaysiiskan oo la dhaqan geliyo dhaqamada cusub ee dhammaan PHI aanu wadno. Haddii aanu go'aan ku gaadho isbeddelkan, waxaanu dib u eegi doonaa Ogaysiiskan oo waxaanu ku soo dhejin doonaa xarumahayaga iyo websaydkayaga bogga www.phelpshealth.org.

**<u>Isticmaalada iyo Shaacinta PHI Ee la samayn Karo La'aanta Oggolaanshahaaga:</u>**

**Wixii ah Daawaynta:** Waxaanu isticmaali karnaa oo shaacinaa PHI gaaga si aanu u bixino, isugu duba ridno, ama u maarayno daryeelkaaga. Tusaale ahaan, waxaanu isticmaali karnaa PHI gaaga si laguu siiyo daawaynta caafimaadka amaadeegyada, oo waxaan wadaagi karnaa PHI gaaga dhakhtarada, kalkaalisooyinka, ardayda ku jirta barnaamiyada tababarka daryeelka caafimaadka,ama shaqaalaha kale ee ku lgutaleh daryeelkaaga.

**Lacag bixinta:** Waxaanu isticmaali karnaa oo u shacin karnaa PHI gaaga ujeedooyinka lacag bixinta. Tusaale ahaan, waxaanu la wadaagi karnaa PHI gaaga shirkadaada caymiska markaas waxaanu heli karnaa lacag bixinta adeegyada daryeelka caafimaadka aanu adiga ku siino. Waxaan sidoo kale u sheegi karnaa caymiyahaaga caafimaadka waxa ku saabsan daawaynta dhakhtarkaagu uu ku taliyay si uu u helo oggolaanshaha hore si loo go'aamiyo haddii qorshahaagu uu dabooli doono kharahka daawaynta.

**Hawlgalada daryeelka caafimaad:** Waxaanu isticmaali karnaa oo u shaacin karnaa PHI gaaga wixii ah ujeedooyinka hawlahayaga ganacsiga. Isticmaaladan ganacsiga ah iyo shaacinaha waxay lama huraan u yihiin in la hubsado bukaanadeenu inay helaan daryeelka tayada leh iyo adeegyada kharashka yar. Tusaale ahaan, waxaanu isticmaali karnaa PHI in dib loo eego tayada daawayntatada iyo adeegyada, si loo qiimeeyo waxqabadka shaqaalahayaga, shaqaalaha qandaraaska haysta, iyoa rdayda adiga ku daryeelaya.

**Uu u baahan yahay Sharcigu:** Waxaanu isticmaali karnaa ama shaacin karnaa PHI gaaga ilaa xadka isticmaalka ama shaacinta uu u baahan yahay federaalka, gobolka ama sharciga maxaliga ah.

**Waxa u baahan Xog yahayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamaha:** Waxaa nalooga baahan karaa in la shaaciyo PHI gaaga Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamaha si loo baadho ama go'aan looga gaadho u hogaansanaantayada shuruudaha sharciga u dambeeya ee Heerarka Gaar ahaanshaha Macluumaadka Caafimaadka Shakhsi ahaan La aqoonsan karo.

**Caafimaadka Dad waynaha:** Waxaanu shaacin karnaa PHI gaaga wixii ah hawlaha caafimamadka dad waynaha, sida u shaacinta macuuliyiinta caafimaadka dad waynaha ama wakaalada kale ee dowladda ee uu sharcigu u oggolaado inay soo ururshaan ama helaan macluumaadka (sida Maamulka Cuntadda iyo Dawada).

**Hawlaha Caafimadka Guud:** Waxaanu shaacin karnaa PHI wakaalada hawlaha caafimaadka guud ee hawlaha uu sharcigu u xilsaaray, sida hanti dhowrka, baadhitaanada, iyo kormeerida. Wakaaladaha kale ee Kormeeridda waxaa ka mid ah wakaaladaha kormeera nidaamka caafimaadka, barnaamijyada dheefaha dowladda, iyo barnaamijyada kale ee maamuleed ee dowladda, iyo sharciyada xuquuqaha madaniga.

**Xad gudubka ama Dayaca:** Haddi aad ahayd dhibanaha xad gudubja, dayaca, ama rabshada guriga, waxaanu u shaacin karnaa PHI gaaga wakaalada dowladda u xilsaaran inay hesho macluumaadkan; Intaa waxa dheer, waxaanu u shaacin karnaa PHI gaaga masuuliyiinta caafimaadka dad waynaha sharcigu u xilsaaray inuu helo warbixinaha ku xad gudubka carruurta iyo dayaca.

**Dacwadaha Garsoorka iyo Maamulka:** Waxaanu shaacin karnaa PHI gaaga anagoo ka jawaabanayna amarka maxkamadda ama maamul maxkamaeed (ilaa xadka shaacintan si degdeg ah loo oggolaado), iyo xaaladaha qaarkood, iyaddoo jawaab u ah yeedhmadda maxkamadda, codsiga shaac ka qaadista, ama nidaamyo kale oo sharci ah.

**Sharci Fulinta:** Waxaanu shaacin karnaa PHI gaaga, in dheer ilaa inta habboon ee shuruudaha sharciga la buuxiyo, wixii ah ujeedooyinka sharci fulinta, sida siinta macluumaad booliska ku saabsan dhibanaha dembiga.

**Baadhayaasha Maydka iyo maamulayaasha Aaska:** Waxaanu u shaacin karnaa PHI gaaga baadhaha maydka, baadhaha caafimamadka, ama maamulaha aaska haddii loo baahdo in la guto waajibaadyada sharci ahaan loo xilsaaray.

**Ku deeqida xubinta jidhka Haddii:** aad tahay ku deeqaha xubinta jidhka ah, waxaanu u shaacin karnaa PHI gaaga ururada helida xubnaha jidhka sida lama huraanka ah si loo fududeeyo ku deeqida xubinta jidhka ama ku beerida xubin jidhka.

**Cilmi baadhida:** Duruufaha qaar hoostood, waxaanu u shaacin karnaa PHI gaaga cilmi baadhayaasha marka cilmi baadhayaasha uu ansixiyay guddida dib u eegida hay'adeed oo dib u eegtay codsiga cilmi baadhida iyo borotokoolada dejisan si loo xaqiijiyo gaar ahaanshaha PHI gaaga.

**Khatarta Halista ah ee Caafimaaka iyo Badbaada ah:** Waxaanu shaacin karnaa PHI gaaga haddii aanu rumaysanahay inay lama huraan tahay si looga hortaggo khatar iyo halis ku soo Socoita caafimaadka dad waynaha ama badbaadada oo waa qof ka aanu macquul ahaan rumaysahay inuu awoodo inuu ka hortaggo ama yareeyo khatarta.

**Qaab shaqeedka Dowladda ee La gaar yeelay:** Marka xaaladaha habboon la adeegsanayo,waxaanu u shaacin karnaa PHI gaaga ujeedooyinka ciidan ama walaacyada amniga qaranka la xidhiidha, sida ujeedooyinka go'aan ka gaadhida Waaxda Arrimaha Ciidankii hore ee u qalmidaada dheefaha.

**Amniga Qaranka iyo Hawlaha Sirdoonka:** Waxaanu u shaacin karnaa PHI gaaga saraakiisha federaalka u xilsaaran sirdoonka, sirdoon raadinta, ilaalinta Madax waynaha, kuwa kale ee loo xilsaaray, ama madaxda ajnabiga ah ee qaran, oo ah ujeedooyinka go'aan ka gaadhida amni sugidaada, iyo hawlaha kale ee amniga ee uu sharcigu oggol yahay.

**Magdhowga Shaqaalaha:** Waxaanu shaacin karnaa PHI gaaga sida lama huraanka ah si loogu hogaansamo sharciyada magdhowga shaqaalaha iyo barnaamijyada la midka ah.

**Maxaabiista:** Waxaanu isticmaali karnaa ama shaacin karnaa PHI gaaga haddii aad tahay maxbuuska ku xidhan xarunta xabsi ah oo aanu samaynay ama helnay PHI gaaga muddada bixita daryeelkaaga.

**Saaxibada ganacsiga:** Waxaanu shaacin karnaa PHI gaaga dadka noo qabta anaga, hawlaha, ama adeegyada ama iyagoo na metelaya oo u baahan inay isticmaalaan ama shaaciyaan PHI Si loo ilaaliyo macluumaadkaaga caafimaadka, waxaanu u baahanahay saaxiibo ganacsi oo ku habboon inay ilaaliyaan macluumaadkaaga.

**<u>Isticmaalada iyo Shaacinaha PHI Lagu samayn karo Heshiiskaaga ama Fursada Ujeedada:</u>**

**Xubnaha Qoyska iyo Saaxiibada:** Iyaddoo aad diido mooyaane, waxaanu u shaacin karnaa xubin qoyskaaga ah, qaraabo, saaxiib dhow, ama qof kasta oo kale oo aad aqoonsato, hadal ahaan ama qoraal ahaan, PHI gaaga si toos ah ula xidhiidha ku lug lahaanshaha qofkaas daryeelkaaga caafimaadka. Haddii aanad awoodin inaad diido shaacintan, waxaanu u shaacin doonaa macluumaadkan sida lama huraanka ah haddii aanu go'aan ku gaadhno in, ay tahay dantaada ugu wanaagsan iyaddoo ku salaysan qiimayntaada xirfadeed. Waxaanu isticmaali karnaa PHI gaaga si aanu ugu wargelino ama u caawino wargelinta xubnaha qoyska, wakiilka gaarka ah, ama qof kasta oo kale oo ka masuul ah daryeelkaaga goobtaada ama xaalada guud.

**Diiwaanka Cusbitaalka:** Marka lagu dhigo cusbitaalka, miduun sidii bukaan jiif ama bukaan socod, waxaanu qori karnaa liiska macluumaadka qaar adiga kugu saabsan, sida magacaaga, goobtaada gudaha cusbitaalka, faahfaahinta guud ee xaaladaada (tusaale caadi ah, degen, khatar ah, iwm.), iyo ku xidhnaantaada diimeed, gudaha diiwaanka tusaha cusbitaalka. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in magacaaga aan lagu darin diiwaanka. Haddii aad doorato inaanad dooran diiwaanka, kuma wargelin karno booqdayaasha joogitaankaaga, goobta, ama xaalada guud.

**<u>Isticmaalka iyo Shaacinaha PHI Ee u Baahan Oggolaanshahaaga.</u>**

**Suuq gaynta:** Waa inaad heshaa oggolaanshahaaga qoran si loo isticmaalo oo loos haaciyo PHI gaaga badanka ujeedooyinks suuq gaynta.

**Iibka PHI:** Waa inaan helnaa oggolaanshahaaga qoran wixii ah shaacin kasta oo PHI gaagu ah kaas oo ka dhigan iibka PHI.

**Isticmaalada kale:** Isticmaalada kale iyo shaacinta PHI gaaga, aan sare lagu faahfaahin, waxaa keliya lagu samayn doonaa oggolaanshahaaga qoran (iyaddoo haddii uu oggolaado ama u baahan yahay sharciga). Waxaad ka noqon kartaa

oggolaanshahaaga, wakhti kasta, qoraal ahaan, laga reebo ilaa xadka aan tallaabo ka qaadanayn si ku tiirsan oggolaanshaha.

**Xuquuqdaada Ku saabsan PHI:**

Waxaad leedahay xuquuq gaar ah oo ku saabsna PHI gaaga, oo hoos lagu sharaxay. Waxaad ku dhaqmi kartaa xuquuqdan addoo ugu soo gudbinaya codsiga qoraal ahaan Sarkaalkayaga Gaar ahaanshaha.

**Xaqa Lagu galo PHI gaaga:** Waxaad xaq u leedahay inaad baadho ama warqad aad ka hesho ama nuqul koronto ah badanka PHI gaaga ka kooban diiwaanadayada caafimaadka iyo biil bixinta. Waxaanu bixin doonaa nuqul ama in kooban oo PHI gaaga ah, caadi ahaan gudaha 30 maalmood oo codsigaaga ah. Waxaanu kugu soo dalaci karnaa kharash yar bog kasta oo la koobiyay iyo lacagta boostada haddii ay habboonaato. Waxaa jira xaalado gaar ah kuwaas oo aanu ku diidi karno codsigaaga inaad ku gasho PHI gaaga.

**Xaqa Lagu codsado Xayiraadaha:** Waxaad xaq u leedahay inaad codsato xayiraado gaar ah oo isticmaalkayaga ah ama shaacinta PHI gaaga. Codsigaaga waa inuu sheegaa xayiraadaha gaarka ah ee la codsaday kaas oo aad doonayso xayiraada in la saaro. Naloogama baahna inaanu aqbalno xayiraada aad codsan karto, laga reebo inaanaan aqbalin u shaacinta PHI gaaga qorshahaaga caafimaadka haddii shaacinta (i) ay tahay lacag bixinta ama hawlgalada daryeelka oo aanu haddii kale u baahan sharcigu, iyo (ii) la xidhiidha shayga daryeelka caafimaadka ama adeega kaas oo aad ku bixisay si buuxda oo jeebka ka baxsan. Haddii aanu aqbalno xayiraada la codsaday, waxa dhici karta inaanaan isticmaalin ama shaacin PHI gaaga oo xad gudub ku ah xayiraadaas iyaddoo loo baahdo in la bixiyo daawaynta degdega ah mooyaane.

**Xaqa lagu Codsado wada xidhiidhka qarsoodiga ah:** Waxaad leedahay xaqa aad ku codsato inaanu kugula soo xidhiidhno qaab gaar ah ama goob gaar ah. Waxaanu habbayn doonaa codsiyada macquulka ah. Waxaad sidoo kale shuruud ku xidhi karnaa habbaynta adigoo lagu waydiinayo macluumaadka sida qaabka lacag bixinta loo samayn doono ama sifooyinka cinwaanka kale ama qaabka kale ee xidhiidhka.

**Xaqa Wax kabeddelka:** Haddii aad dareento in PHI aanu adiga kaa haynaa uu khalad yahay ama aanu dhammaystirnayn, waxaad na waydiin kartaa inaad wax ka beddesho macluumaadka ay ka kooban tahay diiwaanadayada caafimaadka iyo biil bixinta. Waxaanu diidi karnaa codsigaaga haddii, tusaale ahaan, aanu go'aan ku gaadhno in PHI gaaga uu sax yahay oo dhammaystiran yahay. Haddii aanu diidno codsigaaga, waxaanu kuu soo diri doonaa adiga sharax qoran oo waxaanu kuu oggolaan karnaa adigu inaad gudbiso warbixinta qoran oo diidmada ah. Haddii aanu aqbalno codsigaaga inaan wax ka beddelno macluumaadka, waxaanu samayn doonaa dedaal macquul ah oo aanu ku wargelino kuwa kale, ay ku jiraan dadka aad magacowdo, wax ka beddelka iyo in lagu daro isbeddelada shaacin kasta mustaqbalka macluumaadkaas.

**Xaqa Xisaabaadka:** Waxaad leedahay xaqa aad hesho "xisaabinta" shaacin gaar ah oo PHI gaaga ah. Xaqa inaad hesho macluumaadkan waxa uu hoos imanayaa dhowr ka reebitaan, xayiraado iyo xadidis: Codsigaaga waa inuu cadeeyaa muddada wakhtiga, aan ka badnaan 6 sanadood. Waxaad codsan kastaa muddo la cadeeyay oo gaaban. Waxaad xaq u leedahay hal codsi oo bilaash ah gudaha muddada 12 bilood oo kasta, laakiin waxaanu kuu beddeli karnaa codsiyo dheeraad ah gudaha muddo 12 bilood isku mid ah. Waxaanu kugu wargelin doonaa waxa ku saabsan isbeddeladan kasta, oo waxaad xor u tahay inaad ka noqoto ama wax ka beddesho codsigaaga qoraal ahaan ka hor kharashyo kasta oo la galo.

**Xaqa In Lagu soo wargeliyo Jebinta:** Waxaad xaq u leedahay in lagugu wargeliyo haddii ay ku saamsayso jebinta PHI aan amniga ahayn; iyo,

**Xaqa In Warqad Lagu Koobiyeeyo Ogaysiiska:** Waxaad leedahay inaad anaga naga hesho nuqulka warqadda ogaysiiskan.

**Xaqa inaan la dooran Helida Wada xidhiidhka Lacag ururinta ah.** Waxaanu kuula soo xidhiidhi karnaa ujeedooyinka lacag ururinta ah. Waxaad leedahay xaqa aanad dooran inaad naga hesho anaga wada xidhiidhkan.

**Is dhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka**

Phelps Health waxay ka qayb gashaa hal ama is waydaariska macluumaadka caafimaadka oo badan ("HIEs"). HIEs waxay noo oggolaataa inaan wadaagno PHI gaaga, ama soo gelida PHI gaaga, adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka kale wixii ah daawaynta, lacag bixinta, iyo ujeedooyinka kale ee la oggol yahay. Ujeedada HIEs waa inay naga caawiso anaga iyo adeeg bixiyaasha kale ee daryeelka caafimaadku inay bixiyaan, mid ka wanaagsan, ka waxtar badan iyo daryeelka la isku duba riday ee bukaanada.

Iyadda oo aad iska dhaafto doorashadeeda mooyaane, PHI gaaga waxa heli doono adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka loo xilsaaray ee kale ee ka qayb gala ama geli kara HIEs la mid ah ka aanu ka qayb galno. Si aad ugu oggolaato adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimamadka kale inay ka soo galaan PHI gaaha dhexda HIEs waxba ha samayn. Akhriska ogaysiiskan iyo inaanad dooran, waxaad oggolaanaysaa in PHI gaaga laga helo dhexda HIEs (ay ku jirto

caafimaadka maskaxda, baadhitaanka hida sidaha, isticmaalka maandooriyaha/khamrada, cudurada lagu kala qaado galmada, HIV/AIDS baadhitaanka/daawaynta, uurka iyo diiwaanada ilma iska soo ridka, ama macluumaad kale oo xasaasiya). Haddii aanad rabin inaad la wadaagto PHI gaaga adeeg bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee kale dhexda HIEs, waa inaanad dooran.

Si aan loo dooran wax HIEs ah, ama macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan HIEs ee hadda ka qayb gala fadlan la xidhiidh Sarkaalka Gaar ahaanshaha.

**Cabashooyinka:**

Haddii aad rumaysan tahay inaanu ku xad gudubnay xuquuqdaada gaar ahaanshaha, waxaad nagu soo xarayn kartaa cabasho anaga addoo ku wargelinaya Sarkaalka Gaar ahaanshaha. Waxaad sidoo kale cabasho ku soo xarayn kartaa Xoghayaga Waaxda Caafimaadka Maraykanka iyo Adeegyada Aadamaha. Kaagama aargoosan doonto adiga qaabnaba wixii ah soo xarayntaada cabashada.

**Macluumaadka Xidhiidhka**

Iyaddoo haddii kale la cadeeyo mooyaane, in lagu dhaqmo xuquuqo kasta oo lagu sharaxay Ogaysiiska, wixi macluumaad dheeraada ah, ama in la soo xareeyo cabasho, fadlan la xidhiidh Sarkaalka Gaar ahaanshaha, lambarka 573-458-7613 Ama qoraal ahaan: Phelps Health, Corporate Compliance and Privacy Officer; 1000 West 10th Street; Rolla, MO 65401.

**Ogaysiiskan waxa uu dhaqan gal yahay 10/14/2020.**